

Dowladda Soomaaliyeed ee Puntland Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta Dhaqaalaha iyo Iskaashiga Caalamiga ah Waaxda Tirokoobka



TUSAHA SICIRKA DAMBIISHA

AGOOSTO 2019

Warbixinta Tusaha Sicirka Dambiisha Ee Bisha Agoosto, 2019


Dhaqdhaqaaqa Billaha ee Tusaha Sicirka Dambiisha

Tusaha guud ee Sicirka Dambiisha qeybaheeda kala-duwan ayaa intii lagu guda jiray bishii Agoosto kaso kacay 84.2 gaarayna 84.3. Isbedelka bishii Agoosto ayaa ah kor u kac dhan 0.1 boqolkiiba, halka uu bishii ka horeysay ee Luulyo hoos u dhacay 0.1 boqolkiiba.

Qaybaha badeecadaha ee sicirkoodu bishaan sida xoogan u siyaaday marka loo eego qeybaha kale ayaa kala ah: qaybta mukhaadaraadka Tubaakada, Jaadka iyo Sigaarka (+6.7%), qaybta kirada Guryaha, Adeegyada Biyaha, Korontada, Gaaska cunada iyo Shidaalka (+4.8), qaybta badeecadaha iyo Adeegyada isku jirka ah (3.7%), Waxbarashada (+2.9%), Dharka iyo Kabaha (+2.0%) iyo qaybta Gaadiidka (+2.0%).

Dhanica kale, hoos u dhac ku yimid sicirka Makhaayadaha iyo Huteellada (-3.3%), Cunada iyo Cabitaanka (-3.1%), Isgaarsiinta (-2.5%), Qalabaynta iyo Dayactirka Guryaha (-2.5%), Caafimaadka (-2.4%), Agabka Dhaqanka iyo Madadaalada (-1.2%) ayaa dheelitiray isbeddelka togan ee ku dhacay sicirka badeecadaha kor ku xusan, taas oo horseeday isu dhawaanshaha heerarka Tusaha guud ee Sicirka Dambiisha iyo jiidimeed ku sugnaasha Jaantuuska dhaqdhaqaaqa Tusaha guud ee Sicirka Dambiisha.


Jaantuuska 1aad: Jaantuusyada heerka sicir bararka iyo dhaq-dhaqaaqa Tusaha guud ee Sicirka Dambiisha.



Jadwalka 1aad: Heerka Sicir bararka iyada loo eegayo TSD- Agoosto 2019 (2015 = 100)

Tusaha Sicirka Dambiisha, Agoosto 2019	
Tusaha (bishan) = Agoosto 2019	84.3
Tusaha (bishii hore) = Luulyo 2019	84.2
Tusaha (sanadkii hore isla bishan) = Agoosto 2018	75.3
Isbedelka % bilaha ah = Agoosto 2019 / Luulyo 2019	0.1
Isbedelka % sanad laha ah (heerka sicir bararka) = Agoosto 2019 / Agoosto 2018	11.9

Jaantuuska 2aad: Tusaha Sicirka Dambiisha: Isbedellada ugu waaweyn ee billaha ah iyada oo loo eegayo hanaanka caalamiga ah ee kala saaridda qaybaha maciishda.



Qaybaha isbedellada togan ee ugu badan ku yimid bisha Agoosto, 2019.

- Sicirka qaybta **Mukhaadaraadka Tubaakada, Jaadka iyo Sigaarka** ayaa kordhay 6.7% bishii agoosto 2019 marka la barbardhigo bishii Luulyo oo uu jiray hoos dhac dhan 4.7 boqolkiiba. Sicirka qeybta Kirada Guryaha, Biyaha, Korantada, Gaaska Cunada iyo Shidaallada kale ayaa bishii Agoosto 2019 siyaaday 4.8%, halka bishii ka horeysay ee Luulyo hoos u dhacay 1.0%. Kor u kaca bishaan ayaa loo aanaynayaa kharashka hagaajinta iyo dayactirka guryaha oo kordhay 4.6% iyo kor u kaca qiimaha gaaska cunnada iyo shidaalka oo isna siyaaday 7.5%.
- Sicirka qaybta **badeecadaha iyo adeegyada isku jirka** ah ayaa bishii Agoosto kacay 3.7% halka uu bishii Luulyo hoos u dhacay 1.6%. kor u kaca bishaan ayaa loo tirinayaa sara u kac ku yimid sicirka badeecadaha is qurxinta sida cilaan saarka oo kordhay 4.8% halka hoos u dhac aan la dareemi karin (-0.9%) ku yimid sicirka badeecadaha xaragada sida saacadaha, dahabka iyo boorsooyinka gacanta. Sicirka adeegga waxbarashada ayaa isna bishii Agoosto kordhay 2.9%, halka uu bishii Luulyo-na kacay 22%. Kororkaan ayaa waxaa u sabab qiimaha dugsiyada sare oo kacay 6.3% iyo qiimaha macaahida lagu barto xirfadaha sida adeegsiga kombiyuutarada, luuqadaha IWM oo kordhay 7.7%.

Qaybaha isbedellada taban ee ugu badan ku yimid bisha Agoosto, 2019.

- **Qaybta dhaqanka iyo madadaalada** waxay muujinaysaa in bishii agoosto 2019 uu jiray hoos u dhac dhan (-1.2%) marka la-barbar dhigo bishii Luulyo oo 1.3% sicirku siyaaday. Intii lagu guda jiray sanadka 2019 waa markii u horeysay ee sicirka qaybtani hoos u dhacdo. Hoos u dhacaan ayaa lagu sababeeyey sicir jab ku yimid badeecadaha kala ah: agabka maqal iyo muqaal gudbiyaha (-1.0%) iyo agab xafiiseedka sida waraaqaha, buugaagta iWM (-1.3%) halka sicirka adeegyada dhaqanka iyo madalada ay hoos u dhaceen (-23.1%).
- **Sicirka badeecadaha iyo adeegyada caafimaadka** ayaa bishii Agoosto hoos u dhacday 2.4 boqolkiiba, halka bishii Luulyo-na uu jiray koror dhan 0.4%. Hoos u dhaca bisha Agoosto ayaa noqonaya markii kowaad ee sicirka guud ee qeybta dawooyinku jabo intii lagu guda jiray sanadka 2019. Agabka caafimaadka (-3.9%) iyo adeegyada daweynta bukaan socodka (-1.9%) ayaa ahaa kuwa sicirkoodu jabay bishii Agoosto.
- Sicirka **Qalabka iyo Agabka Guryaha iyo Hagaajintooda** ayaa bishii Agoosto jabay 2.5% marka la barbar-dhigo sicir barar gaaraya 1.1% oo loo diwaan-gashay bishii Luulyo. Badeecadaha sida aadka ah sicirkoodu hoos ugu

dhacay ayaa kala ah: Agabka jifka iyo fadhiga (-5.6%), miisaska iyo maacuunta (-3.0%) iyo adeegayda dayactirka agabka guryaha (-3.5%).

- **Sicirka badeecadaha iyo adeegyada Isgaarsiinta** ayaa bishii agoosto 2019 hoos u dhacay 2.5%, halka bishii Luulyo aan waxa isbedel ah jirin. Isbedelka ugu weyn ee bisha Agoosto 2019, waxaa sababay hoos u dhac ku yimid qalabka telefoonada (-2.5%) iyo khidmadaha ku hadalka daqiiqadaha (-2.5%).

Dhaqdhaqaaqa Sanadlaha ee Tusaha Sicirka Dambiisha ee sanad dhamaadka Agoosto 2019

Isbedelka sanadlaha ah ee sicirka (heerka sicir bararka) 12-kii billood ee u dhaxeeyey Agoosto 2018 iyo Agoosto 2019 ayaa siyaaday 11.9 boqolkiiba, halka sanad kii ka horeeyey ee Luuliyo 2018 iyo Luuliyo 2019 uu kordhay 8.8 boqolkiiba.

Qaybaha badeecadaha ee sicirkoodu sida xoogan u siyaaday 12-kii billood ee u dhaxeysay Agoosto 2018 iyo Agoosto 2019 ayaa kala ah: qaybta **Kirada Guryaha, Adeegyada Biyaha, Korontada iyo Gaaska** (+19.8%), **Dharka iyo Kabaha** (+19.2%), **Gaadiidka** (+18.3%), qaybta **mukhaadaraadka Tubaakada, Jaadka iyo Sigaarka** (+16.7%), **Agabka iyo adeegyada dhaqanka iyo madadaalada** (+13.2%), iyo **Caafimaadka** (+11.8%). Guud ahaan, isbedelka Sicirka qeybaha kala duwan ee maciishda ee 12-kii billood u dambeeyey (Agoosto 2018-Agoosto 2019) ayaa ahaa mid togan marka laga reebo isgaarsiinta oo celcelis ahaan hoos u dhacday (0.2%).

Tusaha Sicirka Dambiisha: Qaybo si gaara loo eeggay, Agoosto 2019

Qaybta cuntada iyo cabitaanada iyo qaybta Kirada Guryaha, iyo Adeegyada Biyaha, Korontada, Gaaska iyo shidaalada kale ayaa hadda ah qeybaha ugu muhiimsan dambiisha tusaha Quutaha marka loo eego saamiga ay ka yihiin kharshaadka qoysaska, tan ayaa ka dhigaysa qeybahaan inay saamaynta ugu badan ku yeeshaan isbedelka Tusaha guud ee Sicirka Dambiisha.


Sicirka **cunada iyo cabitaanada** ayaa intii lagu guda jiray bishii agoosto wajahay hoos u dhac dhan 3.1%. Halka sicir bararka sanadlaha ah ee qaybta cuntada iyo cabitaanada sanad dhamaadka Agoosto 2019 siyaaday 8.1% marka la barbardhigo sicir bararka Luuliyo 2019 ee kabil kabil oo kordhay 6.9%.

Sicirka qeybta Kirada Guryaha, Adeegyada Biyaha, Korontada, Gaaska iyo shidaalada kale ayaa celcelish ahaan waxay kordheen 4.8 % bishii Agoosto. Halka sicir bararka sanadlaha ee sanad dhamaadka Agoosto 2019 siyaaday 19.8%, halka sicir bararka kabil-kabil ee Luuliyo 2019 uu ahaa 11.8%.

All Groups CPI and Selected Groups


INDEX

Index = 100 @ 2015



Source: Puntland Statistics Department

TSD: Jaantuuska 4aad; Sicir bararka sanadlaha ah ee qeybahaha badeecadaha iyada oo loo-eegayo hanaanka caalamiga ee kala soocida badeecadaha; Agoosto 2019.



Qaybaha Sicir-kororka sanadlaha ee ugu ballaraan ku yimid Sanad dhamaadka Agoosto 2019.

- **Qaybta Kirada Guryaha, Adeegyada Biyaha, Korontada, Gaaska iyo shidaalada kale** ayaa celcelis sanad dhamaadka Agoosto 2019 kordhay 19.8% marka loo barbardhigo sanadk dhamaadkii ka horeeyey ee Luulyo 2019 oo uu kordhay 11.8%. Sicir kororkan waxaa sababay: kirada guryaha oo siyaaday (12.9%), dayactirka guryaha oo kordhay (16.9%) iyo korontada, gaaska iyo shidaalada kale oo siyaaday (24.5%).
- **Dharka iyo kabaha** ayaa sanadkii ku dhamaaday Agoosto 2019 kacay 19.2%, halka uu sanadkii ku dhamaaday Luuliyo 2019-kana siyaaday 15.5%. Kor u kacani ayaa ka yimid: dharka oo siyaaday (22.8%) iyo kabaha oo sicirkoodu kordhay (6.5%).

- **Sicirka Adeegyada Gaadiidka** ayaa sanadkii ku ekaa agoosto 2019 kordhay 18.3% halka 16.9% ay siyaadeen sanad dhamaadkii bisha Luuliyo 2019.
- **Sicirka Mukhaadaraadka (jaadka tubaakada iyo sigaarka)** ayaa sanadkii ku dhamaaday Agoosto 2019 celcelis ahaan kacay 16.7% marka loo eego sanadkii ku dhamaaday Luulyo 2019 oo qiimuhu kordhay 7.3%. Sicir kororkaan ayaa loo sababeeyey sicirka tubaakada oo siyaaday (22.5%) iyo jaadka oo isna kacay (7.4%).
- **Sicirka badeecadaha iyo adeegyada Dhaqanka iyo madadaalada** ayaa 13.2% siyaaday intii u dhaxaysay Agoosto 2018 iyo Agoosto 2019, marka loo barbar dhigo korkicii Sanadkii ku ekaa Luuliyo 2019 oo dhamaa 12.8%. sicir bararkaan ayaa waxaa loo aanaynayaa agab qoraalleedka xafiisyada oo kacay (14.3%), agabka maqal iyo muqaal gudbiyaha oo isna kordhay (12.3%) iyo adeegyada dhaqanka iyo madadaalada (33.9%) siyaaday.

Dhamaan isbedelka sicirka qaybaha TSD ayaa sanad dhamaadkii Agoosto 2019 ahaa mid togan marka laga reebo sicirka adeegyada isgaarsiinta oo celcelis ahaan hoos u dhacday 0.2%.

Tusaha Sicirka Dambiisha: Sookoobidda dhaq-dhaqaaqaha iyo ka qeybqaadshada sicir bararka ee qeybaha badeecadaha iyada loo-eegayo hanaanka kala soocida badeecadaha

Jadwalka 2: Tirooyinka ugu muhiimsan dhaq-dhaqaaqyada August 2019 iyada oo laga eegayo hanaanka kala soocida badeecadaha (Index = 100 at 2015)

Hanaanka caalamiga ah ee kala soocida badeecadaha (COICOP)	Aug-18 Tusaha	Jul-19 Tusaha	Aug-19 Tusaha	Jul-19 to Aug- 19 (Bile) % Isbedelka	Aug-18 to Aug- 19 (Sanadle) % Isbedelka
TSD ee dhamaan qaybaha badeecadaha	75.3	84.2	84.3	0.1	11.9
Cunada iyo Cabitaanada	74.2	82.7	80.1	-3.1	8.1
Mukhaadiradka (tubakada, jaadka iyo sigaarka)	76.6	83.7	89.4	6.7	16.7
Dharka iyo Kabaha	71.2	83.2	84.8	2.0	19.2
Kirada guryaha, Biyaha, Korontda, Gaas iyo Shidaalada kale	74.1	84.7	88.8	4.8	19.8
Agabka Guryaha iyo Dayactirka	79.0	86.3	84.2	-2.5	6.5
Caafimaadka	71.0	81.3	79.4	-2.4	11.8
Gaadiidka	76.2	88.4	90.2	2.0	18.3
Isgaarsiinta	83.9	85.9	83.7	-2.5	-0.2
Dhaqanka iyo Madadaalada	85.0	97.4	96.2	-1.2	13.2
Waxbarashada	82.3	84.0	86.5	2.9	5.1
Maqaaxiyaha iyo Huteelada	70.3	77.0	74.4	-3.3	5.9
Badeecadaha iyo Adeegyada isku jirka ah	105.1	110.5	114.6	3.7	9.0

Sida Qeybaha badeecadaha ee hanaanka kala soocida maciishaduhu ugu qeyb-qaataan sicir Bararka Sanadlaha

Jaantuuska 1: Sida qeybaha badeecadaha uga qeybqaataan Dhaq-dhaqaaqa TSD ee dhamaan qeybaha maciishad; Agoosto 2019.


FG: Saameynt ay qayb kasta oo kamid ah qeybahaha uu kakooban yahay hanaanka kala soocida badeecadaha ay ku yeelanayso isbedelka Tusaha guud ee Sicirka Dambiisha waxay ku xiirantahay saami culeyska ay qeyb walba ka tahay culeys dhismeedka Guud.

(weighted %) by COICOP Group to the All Groups CPI; August 2019.

All Groups CPI

POINTS CONTRIBUTION (%)

Points contribution to inflation rate (contribution by COICOP)



Source: Puntland Statistics Department